



# VISITOR GUIDELINES



## Qodabada Booqdayaalka Nadaamka Booqashada Bukaan-Jiifka Xiligga Jirada Hawa Mareenada

Laga bilaabo Talaadada, gu'soore 22, 2019 ilaa ogeysiis danbe, nadaam ayaan u dajinay booqdaha, si loo ilaaayo bukaanada, qoysaska, booqdayaasha iyo shaqaalaha.

1. Dhamaan waalidiinta mar walba waa soo dhaweynaynaa umana aqoonsanin in ay yihiin "booqdayaal."
2. Wakhtiga booqashada dadka kale waa inta u dhaxaysa 8 subaxnimo iyo 9 fiidnimo.
3. Booqdayaalka, oo ay ka mid yihiin walaaluhu, ma booqan karaan haddii ay leeyihii astaamahan, qandho, qufac, cuno xanuun ama duuf.
4. Waalidiinta astaamaha jirada hawo mareenadu ka muuqdaan way booqan karaan, laakiin waa in ay xirtaan maaskaro.
5. Waalidiinta iyo booqdayaalka waa in la baaraa caafimaad qabkooda maalin walba. Waalidiinta iyo booqdayaalka waxaa la siin doonaa oo ay xiran doonaan aqoonsi cagaaran, jaale ama guduud ah. Warqadahani waxay cadaynayaan:
  - Cagaar – Wuu booqan karaa, uma baahna maaskaro
  - Jaalle – Wuu booqan karaa, waa in uu xirtaa maaskaro
  - Guduud – Ma booqan karo qaybaha bukaan-jiiifka, maaskaro waa in uu xirtaa



6. Qaybaha uu ka koobanyahay isbitaalku ayaa xadididoona tirada booqdayaalka markiiba gali kara-waydii kalkaliyada ilmaha. Waalidiinta iyo booqdayaalka aan wadan warqadda aqoonsiga, ma gali karaan qaybaha daryeelka bukaanka.
7. Dhamaan waalidiinta iyo booqdayaalka, waxaa laga rabaa in ay gacmaha ku nadiifiyaan barta caafimaad baaridda, iyo ka hor inta aysan galin qolka bukaanka.
8. Waalidiinta iyo booqdayaasha waxaa la fari karaa in ay xirtaan maaskarada inta ay joogaan isbitaalka.
9. Wuxaad arkidoontaan shaqaalaha oo xiran maaskaro si ay isu badbaadiyaan una badbaadiyaan bukaanka.
10. Waalidiinta iyo booqdayaalka waxaa laga codsankaraa in ay ka baxaan isbitaalka, haddii aysan raacin nadaamka booqashada ama aysan xiran maaskarada la faray.
11. Xaalado gaar ah awgood, waxaa suurto gal ah in la dabciyo nadaamka booqashada, haddii ay macquul tahay. Waalidiintu waxay kala hadli karaan arintaan kalkaliyaha ilmahaaga ama adeegaha bulshada.